# Ku socota waalidiinta





## Ku soo dhawaada naadiga ABC!

Waa wax qiimo weyn in aad ka war hayso marka ay carruurtu baranayaan sida wax loo akhriyo. Ilmahaagu waxa uu hadda helay buugaagta waxbarashada ee naadiga ABC. Halkan waxa aan kuugu soo gudbinaynaa macluumaad ku saabsan buugaagta waxbarashada.

**Buugga shaqada** ee ay carruurtu ka shaqeeyaan marka ay dugsiga joogaan, waa mid soo gudbinaya xarfaha oo si nidaam leh oo habaysan u kala horreeya. Waxa buugga shaqada ku jira laylisyo lagu baranayo akhriska iyo qoraaalka, halxidhaalayaal, ereyo lagu ciyaaro iyo waliba laylisyo kaa caawinaya fahamka akhriska iyo qaar kale. Halkan weeye halka ay carruurtu ku baranayaan farsamada wax loo akhriyo iyo sida wax loo qoro.




**Buugga akhriska** ee la yidhaa Mucjisadii footariga, waa buug ku saabsan carruurta kala ah, Asta, Bea iyo Cesar iyo waxyaabaha ay ka sameeyaan naadigooda – Naadiga ABC, waxa ay ubadku ku tababartaan awooddooda akhris. Buugga akhrisku waxa uu ka kooban yahay saddex qaybood oo kala duwan. Sidaasi daraadeed carruurtu waxa ay u akhrisan karaan sida ay doonaan, waxaanay sidoo kale iyaga iyo saaxiibadoodba ka heli karaan dhacdooyin cusub.




**Buugga A** waxa uu leeyahay qoraal yar iyo sawirro badan.
**Buugga B** waxa uu leeyahay qoraal ka yara badan ka hore, balse dhanka tirada sawirradu waa isku mid.
**Buugga C** waxa uu leeyahay qoraal badan, balse ma laha sawirro badan.
Carruurta intooda badani marka ay bilaabaan fasalka koowaad waxa ay tababar ku sameeyaan akhriska buugga A. Marka ay helaan furaha akhriska ee ay noqdaan kuwo akhriska bartay, waxa ay bilaabaan in ay akhriyaan buugga B. Buugga C waxa marka dugsiga la joogo carruurta u akhriya macallinka.




Xitaa haddii masuuliyadda akhriska ee ilmuhu ay saaran tahay dugsiga, waxa haddana jira wax badan oo aad adigu waalid ahaan u qaban karto ilmahaaga si akhriskiisa iyo afkiisu u horumaro. Gaar ahaan bilowga tababarka akhriska waxa muhiim ah in ilmuhu hal qoraal akhriyo dhawr jeer si uu kor ugu qaado awooddiisa iyo xawaarihiisa akhriska. Hawshaasi waxa aad ilmaha ku taageeri kartaa adiga oo dhiirrigeliya ama caawiya. Waxa aad dhegaysan kartaa qoraalka adiga oo xiiso u muujinaya, xitaa haddii aanad fahmayn erey kasta ama haddii aanad hubin habka uu ilmuhu ugu dhawaaqayo. Waxa aad

**Kopieringsunderlag** © Författarna, översättaren Musa M. Isse och Natur & Kultur *ABC-klubben Åk 1 Den magiska kulan*, Kompletterande lärarhandledning för språkstödjande undervisning ISBN 978-91-27-45714-0

ilmaha ka codsan kartaa in uu qoraalka kaaga sheekeeyo isaga oo kugula hadlaya afkiina hooyo. Haddii aannu ilmuhu intaa samayn karin, waxa laga yaabaa in ilmaha laftigiisu aannu fahmin qoraalka. Haddaba waa muhiim in aad u sheegto macallinka, si uu ilmahaagu caawimo uga helo dugsigiisa.

Marka laga yimaaddo buugga akhriska waxa uu sidoo kale ilmuhu u baahan yahay in uu helo buugaag kale oo badan. Waa in uu buugaagtaasi ka helaa dugsiga iyo gurigaba. Maktabadda waxa yaalla buugaag kuwa carruurta ah oo sawirro leh iyo kuwo qoraallo kookooban leh. Xitaa haddii uu ilmuhu akhrin karo buugaagtaasi waxa laga yaabaa in uu rabo in uu dhegaysto oo loo akhriyo. Ilmahaaga u akhri buugaagta adiga oo ugu akhrinaya afkiisa hooyo. Ilmo yaqaana ereyo badan oo afkiisa hooyo ahi waxa u dhib yar in uu barto af cusub. Isku daya in aad ka wada sheekaysataan waxa aad akhrinaysaan. Waxa aad sidoo kale ku wada hadli kartaan afkiina hooyo. Mar kasta oo aad ka wada sheekaysataan waxa aad akhrinaysaan waxa ay ubadku wax u bartaan si fiican, waxaana kor u kaca xiisahooda akhriska iyo buugaagta ay u qabaan – waxa ay taasi u sahashaa in ay ereyo badan bartaan iyo in ay aqoon fiican u yeeshaan adduunka.

Akhriska buugaagtu waxa uu abuuraa mala-awaal iyo in si fiican loo fahmo dadka kale, wakhtiyada kale iyo dhaqamada kale. Waxaanu ilmahaagu yeelanayaa af cusub oo nool.

**Nasiib wacan!**



**Kopieringsunderlag** © Författarna, översättaren Musa M. Isse och Natur & Kultur *ABC-klubben Åk 1 Den magiska kulan*, Kompletterande lärarhandledning för språkstödjande undervisning ISBN 978-91-27-45714-0